Ka hor intaan ilmahaaga la siin daawada Rotarix®, u sheeg kalkaaliyaha caafimaadka ama dhakhtarka in ilmahaagu:

- xasaasi ku yahay wax uun
- hadda ka hor dhibaato kala kulmay qaadashada daawada Rotarix®
- qabo xanuun xummad wata
- uu qaato ama dhowaan uu qaadan jirey wax daawo ah, xataa kuwa aan u baahnayn warqad dhakhtar
- dhowaan lagu tallaalay tallaal nooc kale ah
- laga qalay, daaweeyey ama laga baaray dhibaatooyin xagga caloosha ama mindhicirada ah
- uu qabo cudur daciifin kara difaaca jirkiisu kaga hortago infakshanada
- uu xiriir dhow la leeyahay qof tusaale ahaan qoyska ka mid ah oo difaaciisa jirku liito, sida qof qaba cudur ama qaata daawo daciifin karta difaaciisa jirka.

Tallaalka kadib

La xiriir kalkaaliyaha caafimaadka ee rugta daryeelka caafimaadka carruurta haddii aad wax aan caadi ahayn ku aragtay ilmahaaga kadib tallaalka.

Baahidaada talo iyo taageero kala xidhiidh kalkaalisadaada xarunta daryeelka carruurta.

Warbixin dheeraad ah iyo adeegyada adiga iyo cafimaadka ilmahaaga iyo daryeel waxay ku jiraan 1177.se. Wac 1177 oo ah talobixinta daryeelka bukaanka. Xilliga xaallad degdeg ah, wac 112.

1177 VÅRDGUIDEN | Stockholms läns landsting

Somaliska

Warbixin ku socota waalidka

Tallaalka looga hortago infakshanka caloosha iyo xiidmaha oo uu keeno fayriska Rotavirus

Waxa laga siiyaa afka laba waqti oo kala duwan laga bilaabo da'da lix toddobaad

1177 VÅRDGUIDEN | Stockholms läns landsting

Dhammaan carruurta ku nool gobolka Stockholm waxaa loogu deeqayaa tallaal lacag la'aan ah oo looga hortegayo infakshanka fayriska rotavirus oona lagu sameynayo rugta daryeelka caafimaadka carruurta (BVC). Tallaalkaas waxaa lagu sameynayaa dhallaanka da'doodu u dhexeyso 6 toddobaad ilaa 5 bilood. Tallaalkaasi wuxuu carruurta ka difaacayaa infakshanka caloosha iyo xiidmaha oo uu keeno fayriskaasi.

Waa maxay fayriska Rotavirus?

Rotavirus waa fiirus caadi u soo noqnoqda oo ku faafsan dunida oo dhan. Fiirusku wuxuu infakshan qaadsiiyaa marinada caloosha iyo xiidmaha.

Sidee infakshanka fayriskaas looga arkaa carruurta?

Infakshanka fayriska Rotavirus waa infakshan khatar ah oo badanaaba carruurta uga dhaca caloosha iyo xiidmaha. Waana mid aad la isu qaadsiiyo. Carruurta badankeed waxay qaadaan bilowga nolosha. Qiyaastii in ku dhow carruurta oo dhan ayaa infakshanka fayriskaas ku qaada inta aysan gaarin shan sano. Saddex meelood oo mid ayaa carruurta infakshanka qaada bilaaba matag, xummad iyo shuban dareere ah oo kedis ku bilowda. Matagga iyo/ama shubanku waxay socdaan qiyaastii 5 ilaa 8 cisho, mararka qaarkoodna ka badan.

Carruurta qaarkood ayaa aad u xanuunsada oo muujiya matag iyo shuban badan, kuwaas oo marka ay ugu daran tahay keena dhacaanka oo jirka ka dhammaada, cusbada jirka oo yaraata, murqa-kogid iyo caalir maskaxda. Qofku marar badan ayuu cudurka qaadi karaa oo la bukan karaa, laakiin marka ugu horreysa ayaa ugu xanuun badan. Infakshanka Rotavirus wuxuu ugu badan yahay bilaha febraayo iyo maarso.

Sidee ayuu khatar u yahay infakshanka Rotavirus?

Infakshanku waa mid culeys dheeraad ah u keena carruurta uu ku dhaco iyo qoysaskooda laakiin dadka intooda badani dhaqso ayey uga bogsadaan daaweyn la'aan. Carruurta da'doodu ka yar tahay laba sano ayaa khatarta ugu weyn ugu sugan in uu ku dhaco infakshan wata cillado badan. Dhif iyo qaliil ayuu ku reebaa iimo joogto ah. In loo dhintaana waa mid aan aad caadi uga ahayn Iswiidhen.

Daawadee lagu daaweeyaa infakshanka Rotavirus?

Tallaalka la isa siiyo waxaa lagu magacaabaa Rotarix®. Waxaana ku jira fayris aan awood lahayn. Tallaalkaasina difaaca jirka ayuu ka dhigaa mid jirka ka ilaaliya infakshanada halista ee Rotavirus. Daawadaan Rotarix® waxaa Yurub laga hirgeliyey sannadkii 2006, waxaana ilaa hadda lagu tallaalay malaayiin dad ah. Ilaa hadda waxaa tallaalkaan lagula dagaalamo Rotavirus hirgeliyey siddeetameeyo dal oo ay ka mid yihiin Finland, Norwey, Boqortooyada Biriteyn, USA, Argentina, Iraaq, Urdun, Itoobiya iyo Koonfurafrika.

Sidee loo qaataa tallaalka Rotavirus?

Tallaalku waa dareere ku jira tuubbo la dhiijiyo. Laba mar oo kala duwan ayaa afka laga siiyaa ilmaha laga soo bilaabo lix toddobaad jir. Tallaalka waxaa ku jira sonkor oo waa macaan tahay. Ilmaha waa la siin karaa iyadoo aan loo eegin waxa uu cunay. Haddii ilmuhu soo tufo ama mataggo, waa in isla markiiba toos loo siiyaa qiyaas kale.

Goorma ayaa la isa siiyaa daawada Rotarix®?

- Qiyaasta 1 waxaa la siin karaa laga bilaabo 6 toddobaad jir.
- Qiyaasta 2 waxaa la siinayaa ugu yaraan bil kadib markii la siiyey qiyaastii koowaad. Waxaa habboon in labadaas qiyaasba ilmaha la soo siiyey inta uusan gaarin 16 toddobaad, laakiin waxaa la siin karaa ilaa da'da 24 toddobaad.
- Carruurta waqtigoodii ka hor dhashay, kadib toddobaadka 27 ee uurka, waxaa loo tallaalayaa sida kor ku qoran. Qiyaasta koowaad waxaa lagu tallaalayaa ilmaha dhasha ka hor toddobaadka 32 ee uurka ama ilmaha ku dhashay miisaanka 1500 g oo lagu siinayo qaybta dhalliinka.
- Tallaalka waxaa carruurta lala siin karaa tallaalada kale oo ka mid ah barnaamijka tallaalka carruurta.



Difaac noocee ah ayuu leeyahay tallaalka Rotarix®?

Tallaalku wuxuu difaac fiican ka siiyaa carruurta infakshanada khatarta ah ee Rotavirus.

Ma jiraan cillado ka imaan kara tallaalkaas?

- *Aad ayey caadi* u tahay in ay ilmaha uu ku dhaco shuban, xaloolxanuun, gaas iyo finan jirka ka soo yaaca.
- En *waa mid aad u dhif ah* in uu keeno cillad ah in qayb mindhicirada ka mid ahi ay kogto (afka dambe ee mindhicirka yar ayaa isku koga oo gala gudaha mindhicirka weyn oo xannibaad keena). Waxaa lagu yaqaan qaylo xooggan oo isbadajoog ah oo tartiib tartiib u soo yaraata. Ilmuhu waa ku matagi karaa. Ilmaha korkiisu waa caddaadaa oo waxaa laga dareemaa tamarla'aan iyo maahsanaan. Haddii astaamahaas lagu arko waxaa toos loo la xiriiri karaa qaabbilaadda gargaarka degdegga ah. Caloosha joogsatay waxaa badanaaba lagu xallin karaa in isbitaalka laga siiyo boomaato.